

## Ku soo dhawoow FACT Young

Waxaan nahay koox caafimaad oo la shaqeysa dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 12 ilaa 18 sano, kuwaas oo caqabad kala kulma qaybo ka mid ah nolosha. Tani waxaa ka mid ah dhibaatooyinka caafimaadkadhimirka, isticmaalka maandooriyaha, ka maqnaanshaha dugsiya, iyo dhibaatooyin la xiriira saaxiibbada ama qoyska. Haddii aad hore uga raadisay caawin meelo kala duwan balse xaaladdu aysan hagaagin, FACT Young waxay kaa caawin kartaa inaad xal hesho.

Haddii aad doonayso inaad caawin ka hesho FACT Young, waxaa laga doonayaa in lagu gudbiyo BUP. Si aad u hesho mid, waxaad la hadli kartaa dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka bulshada, BUP, adeegyada daryeelka carruurta ama dadka kale ee aad la xiriiri karto ee degmada.




Taageerada aad ka hesho kooxdeena waxay ku xirnaan doontaa rabitaankaaga, baahiyahaaga iyo awoodahaaga. Kooxdeena waxay ka kooban tahay cilmi-nafsiyahan, daaweeye qoys, daaweeye deegaanka, khabiir maandooriye, iyo la-taliye khibradeed.

**Adiga ayaa go'aansanaya halka aanu ku kulmayno iyo cidda aad rabto inaad hore u la timaado.**

Waxaan ku siin karnaa caawin wax ku ool ah, aan kula tagi karnaa kulamada, aan kula hadli karnaa, ama waxaan kula qaban karnaa hawlo kala duwan.

## Wada-shaqayn

FACT Young waxay la shaqeysaa hay'ado kale si loo hubiyo inaad hesho taageerada kugu habboon.



Tusaale ahaan, waxaan la shaqeyn karnaa xarumaha dhallinyarada, dugsigaaga, adeegga caafimaadka dugsiga, PPT, adeegyada daryeelka carruurta, BUP iyo Nav. Si wadajir ahaan, waxaan isku dayaynaa inaan helno xalal wanaagsan oo hagaajin kara xaaladdaada.

Qoyskaagu wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa fayyo-qabkaaga. Waxaan sidoo kale la hadli karnaa oo talo siin karnaa waalidiinta iyo mas'uuliyiinta daryeelka.

## Ka qaybgal

Diiraddeena ugu weyn ayaa ah adiga. Taasi waxay ka dhigan tahay in rabitaankaaga iyo baahiyahaaga ay nagu hagi doonaan sidii aan kuu caawin lahayn!



## Xuquuqahaaga

Markaad bukaan ama adeeg isticmale tahay, waxaad leedahay xuquuq badan. Qaarkaa waxaa ka mid ah:



## Macluumaad

Waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo macluumaad kugu filan oo ku saabsan caafimaadkaaga, xuquuqdaada iyo daryeelka aad helayso.

## Oggolaansho

Markaad gaarto 16 sano ama ka weyn, waxaa laguu tixgeliyaa qof qaangaar ah marka laga hadlayo arrimaha caafimaadkaaga. Taasi waxay ka dhigan tahay inaad si cad u oggolaato adeegyada caafimaad ee lagu siinayo. Haddii aad ka yar tahay 16 sano, waalidiintaada ayaa oggolaanshaha bixiya, balse weli waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo macluumaad iyo in aragtidaada la maqlo.



## Asturnaanta

Kooxdeenu waxaa waajib ku ah asturnaanta. Taasi waxay la micno tahay in waxa aan ka wada hadalno aan lala wadaagi karin cid kale.

Waxaa jira sharciyo iyo xeerar badan oo ku khuseeya marka aad tahay bukaan ama adeeg-qaate adeeg caafimaad. Kooxda FACT Young waxay ku siin kartaa macluumaad dheeraad ah arrintan marka aan kula kulanno.